



ROHKEE!

ROHKEE! waa mashruuc maalgelin ka helaya Sanduuqa Midowga Yurub ee Magangalyada, Socdaalka iyo Isdhexgalka (AMIF), kaas oo socon doona muddo laba sano ah. Waxaa mashruuca hirgelintiisa mas'uul ka ah Ururka Daryeelka Carruurta ee Mannerheim (Mannerheimin lastensuojeluliitto), gaar ahaan qaybta Uusimaa.

Mashruuca waxaa loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada da'doodu tahay 9–18 sano kuwaas oo ka yimid dalal ay ka jiraan dagaallo iyo dhibaatooyin, oo hadda ku nool xaafadaha Helsinki iyo Vantaa.

Mashruucu carruurta iyo dhalinyarada ayuu si habaysan u taagerayaa, isagoo adeegsanaya luqadooda hooyo:

- Kooxaha BFK (Baridda Farsamooyinka Soo Kabashada) ee loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada la kulantay dhaawac maskaxeed (trauma). Waa barnaamij soconaya muddo shan usbuuc (5×2 saacadood). Waxaa la dhigaa wakhtiga iskuulka, ardayga ka qayb qaata se calaamad maqnaasho Wilma lagama saarayo.
- Kooxaha ROHKEE! oo taageeraya isdhexgalka bulshada, helidda saaxiibo cusub iyo ka qaybgalka waxqabadyo madadaalo (harrastukset). Barnaamijkani wuxuu soconayaa siddeed toddobaad, wuxuuna dhacayaa wakhtiga iskuulka ka dib (8×2.5 saacadood).
 - Taageero nafsiyeed oo shaqsiyan ah oo loo habeeyay baahiyaha carruurta iyo dhalinyarada (waxa la dhigaa wakhtiga iskuulka, ardeyga ka qayb qaato calaamad maqnaansho nidaamka Wilma lagama saarayo).
 - Hoggaan ku saabsan waxbarashada iyo taageerid shaqsiyan ah (waxaana lagu qabanayaa wakhtiga iskuulka, ardeyga ka qayb qaato calaamad maqnaansho nidaamka Wilma lagama saarayo).



Euroopan unionin
osarahoittama



MANNERHEIMIN
LASTENSUOJELUJÄRJESTÖ
Uudenmaan piiri

uudenmaanpiiri.mll.fi/rohkee

ROHKEE!

Sidoo kale, waxaa la qaban doonaa saddex kooxood oo loogu talagalay waxqabadyo xiiso leh (harrastus) oo toddobaadkii mar kulmaya:

- Kooxda jaantada/ciyaarta K-pop ee carruurta da'doodu tahay 12-17 sano (Pasila, Helsinki)
 - Kooxda gabdhaha oo ku baxaysa af-Carabi ee carruurta da'doodu tahay 9-12 sano (Kallahti/Vuosaari, Helsinki)
- Kooxda qaxwada luqadda Finnish-ka ee ardayda dugsigga sare (yläaste) (Pasila, Helsinki)

Dhammaan waxqabadyada mashruuca ROHKEE! waa lacag la'aan.

Waa maxay BFK?

Mashruucu wuxuu adeegsadaa habka BFK (Baridda Farsamooyinka Soo Kabashada), oo ah hab caafimaad nafsadeed oo ka hortag ah, kaas oo loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada la kulantay dhaawaca iyo waalidkood. Habkani wuxuu ku salaysan yahay daawaynta garashada dhaawaca oo taabaneysa dhaqanka. Faragelintu waxay taageertaa carruurta iyo dhallinyarada soo gaartay dhibaatooyin ka dhashay musiibooyinka dabiiciga ah iyo dagaallada, waxaana lagu barayaa saameynta ay leedahay soo-gaadhista dhaawaca (walbahaarka) iyo farsamooyinka lagu yareyn karo dhibka iyo sida loo maamulo.

ROHKEE! Oo taagereysa waxbarashada

Mashruuca ROHKEE! wuxuu taageerid waxbarasho siinayaa carruurta iyo dhallinyarada ka soo guuray dalal saddexaad, wuxuuna kor u qaadaya heerka waxbarashadooda iyo dhamaystirka tacliinta. Awooddooda waxaa lagu xoojinayaa waxqabadyo kooxeed iyo taageero shaqsiyan ah si ay waxbarashadoodu ugu hirgasho, una sii gudbaan marxaladaha waxbarashada ee ku xiga.

Adkaysigooda waxaa lagu xoojinayaa iyadoo la siinayo taageero xooggan si ay uga gudbaan dhaawacyada iyo dhibaatooyinka, taas oo kor u qaadaysa awoodda carruurta iyo dhallinyarada ee ay wax cusub ku baran karaan iyo inay arkaan fursadaha waxbarasho ee mustaqbalkooda.



Euroopan unionin
osarahoittama



MANNERHEIMIN
LASTENSUOJELUJÄRJESTÖN
Uudenmaan piiri

uudenmaanpiiri.mll.fi/rohkee

ROHKEE!

Ujeedada mashruuca ROHKEE!

Ujeedada mashruuca waa in carruurta iyo dhallinyarada ka qaybqaadanaya ay dareemaan in lagu taageeray waxbarashadooda iyo waxqabadkooda, ayna kor u qaadaan darajooyinkooda iskuulka. Carruurta iyo dhallinyarada waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay bartaan awooddooda iyo fursadaha waxbarashada dambe ee soo socda.

Mashruucu wuxuu yareynayaa ka go'itaanka waxbarashada ee carruurta kasoo guurtay dalal saddexaad, wuxuuna kor u qaadaya tirada carruurta iyo dhallinyarada sii wada waxbarashadooda. Waxa uu sidoo kale kordhinayaa heerka waxbarashada sare ee carruurta ka soo jeeda reero wadanka u soo guuray. Carruurta iyo dhallinyarada la kulmaya caqabado waxbarasho iyo kuwo nolosha la xiriira ayaa helaya taageero ku habboon xaaladdooda.

Si toos ah ayaad noola soo xiriiri kartaa:

Katri Kuikka (Finnish, Ingiriis iyo Faransiis)
Madaxa Mashruuca, tel. +358 44 76 58 581, katri.kuikka@mll.fi

Reem Suliman (Carabi, Finnish iyo Ingiriis)
Isuduwaha, tel. +358 44 4915709, reem.suliman@mll.fi

Olha Muravytska (Ukrayn, Ruush iyo Ingiriis)
Isuduwaha, tel. +358 044 5005 395, olha.muravytska@mll.fi

Waxaad sidoo kale noogu soo diri kartaa email ku qoran luqaddaada hooyo ama fariin cod ah oo WhatsApp ah; anaga ayaa kula soo xiriiri doona.